2 – DHALASHADA

Fiqi — Ilmuhu markuu dhasho, marka ugu horreysa waxaa la yiraahdaa: “Yaa sacabsaday yaase soo ballaeeyay?” oo halkaa waxaa laga qiyaasaa dabeecadda qoofka, oo naagta umulisada ah waxaa la yiraahdaa: “heblaa sacabsatay” oo markuu soo dhacaya ilmaha oo sacabbada u dhigtay. Midna waxaa la yiraahdaa marka uu dhasho ilmuhu Ciisaa yimid guriga: “isaga soo beleenay”, yaa la yiraahdaa. Dabeecaddii baa markaa halkaa laga gaadayaa. Waxaa la yiraahdaa: “Ciisaa soo balleeyey”. Waxaa lagu xujeeyaa: “yaa gardaadshay?”. Marka halkaana dabeecadda laga baara. Markaas, waxaa jira, cashaan, ilmuhu markuu dhasho dabeecad uu u dhasho oo ilmuhu kolka hore waa isaga hedaaqaa “oooo...” Saas uu yiraahdaa, isha la raacaa. Hedeeyaa ku xiga ... Garashada halkaasuu ka bilaabaa.

A. N. — Sida la socotaan Soomaaliya waxay leedahay qola waliba dhagan hore oo aad u jiray. Dhaqankaa gabowga ah wuxuu leeyahay meelo uu ka bilowda ayuu leeyahay. Meelaha uu ka bilowda waxaa ka mid ah: ilmuhu markay uurka galaan magacyada loo yaqaano, Fiqi Buraalow maxaad intay uurka ku jiraan nin, magacyada caruurta loo yaqaano maxaad ka xasuusata?

Fiqi — Horta, ereyga aad i weyddiisay, inkastoo aad igu soo kodisay, dhaqan horta waxaa weeye wax aad u fog, aadna u ballaara, hase ahaata ee, haddii aan in yar isku dayno ilmaha markuu uurka galo isaga oo uusan marna waxaa laga eegaa xagga hooyadiis, maxaa ku kordhey, marna waxaa la yiraahdaa calooshuu ku jiraa oo waa la gartaa in halkaas la qiyaasi dabadeedu waa wax dhasha. Marka ugu horreyso waxaa la yiraahdaa, “gabadha hablo la yiraahdaa xaaska ina hebee waa wallacay”. Markaa uu wallacay, raggii raabyibiinta ahaa, markay haweenku ka mayrtaan caadada asay rabaan in habeenkaa is arkaan, nimankii aad wax u jirrabi jiray shayga shay ugu wanaagsan ayay habeenkaa ku cashayn jireen ama xag timir ha noqoto ama xag caano ha noqoto, wax uun la is leeyahay waa qurux badanyihiin ayaa lagu billaabi jiray wax. Waxaa kaloo markaa la oran jiray”. Naagtu waa intaasoo walacdaaye, tolow maxaa ugu wanaagsanoo u fiican inay aragto marka ugu horrayso indhaha ku dhufato “Marka raggu badiba wuxuu samayn jiray faras wanaagsan ama geenyo wanaagsan baa guriga hortiisa lagu xiri jiray, ama ay arki jirtay oo la oran jiray: “naa hebel, waxeed yeeleysaa haddaad wallac iyo wax yar iska dareento weliga eeg xagga fardhaha. Halkaasoo laga eegaayo qurux ahaan looga eegeeyo cuntada hore la cunayna ama dabeecad ahaan ama quwad ahaan oo xoog ahaan ama qurux ahaanba loogu dan lahaan jiray cuntada la cunayo. Intaa markaynu soo dhaafno waxaynu garannay in gabadhii wallacday, wallacii haddii wallacdo. Waxaa la oran jiray markaas uusan ilmaha muugan “uur yarey leedahay”. Marka yaryarahaan markaa la leeyahay waa dareen jira laakiin aan weli caloosha markaa hadduu ku jiro dhowr bilood, hadduu Alle yiraahdo, qiyaas baa layska samayn jiray oo waxaa la oran jiray, anigu saas xusuusnaha hadda bila uun ayaa loo tirin jiray. Markaas magacaas waxaa loo kale bixin jiray, ilmuhu intuu uurka ku jiro nooc gooni buu ahaa, markuu bannaanka u soo baxena nooc gooni buuni ahaa. Haddii markaas ayan dhicinin oo calaashaan ilmahaada isaga daayaba wallaahi erey baa la oran jiray laakiin ereyga isaga ah

uureyaradaa wax ka weyn oo aan iraaho inaan xusuustaa mooje bal idinku taas igu kaba haddaba...

**A. N** Hadda waxaan u waregeeyeyaa Daahir Afqarshe, Daahir Afqarshow maxaad ku biirin lahayd adigu intii uu noo sheegay. Ibrahim Fiqiburaale. Maxaysa kula tahay magacyeda loo yaqaan marka ilmuhu uurka ku jiraan maxaad ka xasuusan tahay?

**Aw Daa** Waad mahadsan tahay, ... i weyddisay, waxa weeye meeshii dadku ka soo farcamayay, habeenka ay habeenada, haddii Ilaahay ilma na siiyo, ay uuraysanayso; wax caada ah, sida Fiqibaraalaba u sheegay, in loo diyaar garooba oo manfaca wanaagsan oo macaan oo soorta adag aan ahayn, oo ilmuhu hadhowta, haddii Ilaahay siiyo, uu dabeeceddaan macaan ka raaco, oo looga jeedo inuun dabeecaddaan macaan qaato. Waxaa kaloo ee jirtaa faras afarta qoob iyo salaadda cad mid aqalkiisa hortiisa ku xiran yahay, oo Ilaahay habeenkii wiilkii u calool galay oo wiilkii haddeer noolyahay, oo afarta qoob iyo salaaddii wiilkii ay caddahayoo aad mooddoo afarta dhudhun na in baras ka maray oo cadyihiin oo shaar dheer, hadheer magaalada uu joogo Xamar. Foodduna ay caddahayoo intaa timaha u soo horraysa cirra uu ku dhashay ay tahay foodaana wejiga ku soo dhowina ay goobaabin cad tahay oo markaa loo qiyaasay labadii dhalay ay sheegeen in aqalka illintiisa faras Xamar ahoo afarta qood iyo salaadda cadi oo ku xirnaa. Halkaa waxaanu ka qaaden karnaa daliil. Waxay kaloo yiqiineen hooyooyinka ilma wanaagsan oo ay jecelyihiin hadduu aqalka jiifo inay toosin jireenna waa la sheegay. Markaa halkaa waxaa la la yiraahdaa “ballaysin”. Ballaysinka waxaa awal u niqiinay ilmuhu markoo dhasho qofka ugu soo horreeye ayaynu oran jirnay. Dadna way khilaafeenno waxay yiraahdeen habeenka uu uurgalo waxaa hooyadii areegto ee ugu horreeya yaa ka xoog badan kii kale. Labadaba waa la arkay, dabadeed dad dabacaddii raacay oo ilma dhashay qofka ugu soo horreeyey lagu yar macayoo lagu ceebeeyey oo la yiraahdo qofka caynkaasaa soo balleeyayoo lagu liido qofkii waa la arkay. Amase qof aad loo ammaano la yiri: “habel ama habla ayuu raacay” oo ballaadikiye (?), labadaa horte arrimoodba balleysimaa loo yaqaanaa oo way jiraan. Haddaynu haddaba soo raacnay oo hooyadu inta ay uurka leedahay, marba marxalay joogtaa yoo dhowrkaa marxalo ay joogtaa ee ma aragtay marka ay dhowr bilood joogto waxaa la bixiyaa Allabari hooyadu ay tiraahdaa “taraaraa”, oo ay haweenka isugu yeedho ayaa jira. Waxaa jira hooyada markii hore ay wallacdo inay waxyaala badan na Karahdo waxyaala badanna jeceshahay. Marka waxaa la yiri, marka ay umulaysana waxyaaba badan ay jeclaataa. Halkaa waa la kala qaadayoo waxaa la yiri “wallac-carar yuu xoola ka dhammaynin, jankuna yuu ku caruurtirin”. Markaa halkaa waxaanu ku qaadanaynaa in dabeecadaha hooyooye ku ay la yimaadaan in la raaco. Waa yahay Maahmaah kaleena waynu leenahay. Waxaa la yiri: “Ninkii diidaa talada culimada caadaabuu mutaa, ninka caamada diidana cuud la’aanu mutaa ninka cilmiga hooyooyinka diidana caruur la’aanu mutaa”. Marka ninkii caruur lihiba inuu saacidoo hooyooyinka ilmaha yaqaana dabeecadahiisa iyo hooyada dhaqaalahooda in aanu ka teqinee, kuwa ma aragtay, uu u fiirsado yaa loo baahan qahay, oo aanu oranin “adigu uun baa ninee teeda ku meel mori”.

**A. N.** Oo waxaad leedahay “wallac” iyo “wallacjebin” iyo “galgaalbax” iyo “jan”,

"seddaweyn".

**Aw Daa** Intaba waa jiraan. Waxaa marka ka xoog roon maka ay umusho, haweenayda sida umusha looga saaro dhaqaalaheeda ayaa waxaa soo dhan ka wada xoog weyn, oo iyada soo celinaayo nafaqadeedii oo ilmaha hadhowto kula korinayaa, oo raggii hore waxay u diyaargareen jireen umusheeda wananka ay u qali lahaayeen ama subaga ay u sii diyaar gareeyeen, ama soor kale oo ay dabadeed umusha kaga baxdo, oo dabadeed haween sharafkooda baa la yiri "waa umul ama waa aroos". Ninku siduu u dhaqaaleeyo marka ay haweenay umusho laba dooba waxay ku xirantahay xannaanada dhex martay ee kalgacalada ah waa ka mid. Maradka oo dhan baa oranaya. "Ninkaas waa wanaajiyaa xaaskiisuyo, dabadeed si wanaagsan beru wax ugu qabtay oo uu nooleeyay" uyedune kalgacalkaas ka go'imaayo haddii ninkiede umusha ku dhaqaaleeyo.

**A. N.** Daahirow adaa watee, waxa la yiraahdo "kuraysiga" oo dhinacaan koonfuraad laga yaqaano, oo haweentu gaartay, gaarto sagaalka biloodba la kureeyo ama subagshubka la yiraahdo oo madaxa subagga loogu shubo ee uyadu taas maxay tahay?

**Fiqi** Taas aan in yar kuugu daro Axmedow. Horta sidaa Aw Daahir u sheegay, arrimuhu waa fara badan yihiin. Mar waxaanu niri: "haweenku way wallacaan", marna waanu niraahnaa, waxaa la yiraahdaa "uuryaro" ama "belayaro". Marka sidaas dhacdo ay qaddir joogaan waxaa la yiraahdaa "jajab" wax la yiraahdo ayaa hala ama wallac jebin. jajabkaas marka wuxuu yiraahdaa, marka ay guur guurhayo ilmuhu yaa sidii fool ahaan ay jirtaa, laakiin aan jirin. Markaas waxay samaystaan iyagu, duucadaa ay sameeyaan waa mid u gaar ah, qofkaa isaga ah oo duca gooni ah weeye, mid haween ah bilisxaawo uun baa keh ka soo tag taas waxaa la samaayaa oo, odayaashii hore samayn jireen marka naagtaasu ay umusho, waxay soo socotaba. Horta intaa ay uurka leedahay waxay ka waxay ka ilaahin jireen waxa ilmaha waa laga ilaaliyaa, oo tanna reer magaaluhu uu yiraahdaa "biitamiin", oo la yiraahdo giyaajada halaga ilaaliyo, caanaha lo'da ah halaga yareeyo. Waxyaabahaa oo aad u weyneynayo badiba waa laga ilaaliyaa. Reer miyiguna horta saasuu ahaa. Markii ay umushana, ama intayan umulin oo wallacii ku jirto, sidaa Aw-Daahir u sheegay, naagtu waxbay doontaa, khusuusan, mid baad arkaysaa dhuxusha ku waalata, waxaad arkaysaa mid had iyo goor beer doonaysa, waxaaba jirta mid aan midba doonaynin ninkaan maryihiisa ku wallacda, waxaaba jirta mid ninkaba necday oo gurigaba oo ka dhaqaaqda, waxaa jirta mid iyadu aan ninkana ku wallacin wax dhibaata ahina ayan ka muuqanin oo aadan ka garanin, laakiin aad ka garato. Naagaha uurka leh dabeecadahooda waa kala duwan tahay ka soo durug oo waxaas oo dhan ka soo bax. Naagtu way umushay, markay umasho wiilka iyo gabadha walqal bay wada leeyihiin, laakiin mid laba wan baa laga walqalaa, midna neef baa laga walqalaa, oo maxaa marka saas loo samaynayaa? Waxaa la yiraahdaa wiilka laba walqalooduu leeyahay, anigu in ay sharci tahay in kaleeta war kama hayo, laakiin rag wada arki jiray laba neefyay qali jireen "walqal" buu ahaa. Markaasaa waxaa la raacin jiray, sida Aw Daahir u sheegay, wan la yiraahdo "riir". Riirtaasuna wuxuu ahaa kaas iyada khaaska u leh; subaggi gooni loogu waxeeyey, kumuskii gooni loogu waxeeyay barafka miyiga gooni loogu waxeeyey, baridii gooni loogu shiilay,

oo naagtaas la leeyahay inay halkaas ku wuuqanin oo isoo tarto halkaas. Waa kow. Tan kaloo arexaa la yiraahdaa: “guurkaaga hore guurkaaga dambe ayuu ama u baas yahay ama kheer u yahay”. Maxaa yeeley hadeed wanaajisana waa lagu ammaanayaa oo, waxaa la oranayaa: “waa ninkii guur wanaagsanayoo saas kuu geli jirey”. Haddaad xumaysana: “Waa kii baas” uun baa lagu oranayaa. Taasna way jiri jirtay.

**A. N.** Markaan Caliyow, Cali Mudiir maxaad ku dari lahayd, waxyaabaha odeeyaashu sheegeen waxa la yiraahdo gaar ahaan kuraysiga ama madax shubka ama jajabka, waxyaabahaas ereyada loo yaqaano markay haweenta uurka leedahay, maxaad ku biiri lahayd?

**Cali M.** Odeyaashu mar hadday arrimahaas ka hadlaan maxaad moodaaba anigu in aan saas iiga muuqan ba, iyagaa ka hadlay. Gabadhu ama islaantu markay yeelato ... siyaado oo ilma galaan, siday u sheegeen, dabeecaddeedu kolba siday noqotaa. Mar iska qaboobay noqotaa, mar way kacdaa, mar wax bay ku kacdaa, sida la sheegay, karaahi iyo jacayl, waxyaaba kolba gabadhaas ama islaantaas raalli ka dhiga ayaa oo qurxan waxay jaclaysato ayaa loo raacraacaa, sida maahmaahyeda ay ku yiraahdeen. Rag badanoo waxaa jira ku naaga beelayoo markii ku kacday oo iska furay: oo gadaal khasaaradii ka ogaadeen, niman guriga uga tageen jira. Sida la sheegay, niman dherkeeda iyo waxaa uursada jira, qaar waxaa jira guriga dhan ka cararto oo aabbaheed iyo hooyadeed aadda ayaa jira. Marka maraaxilkaas haweenka ku imanayo markay uurka yeelato adduunku waa iskaga mid, magacyaal ku kala beddelan waa isaga mid: jinta, kuraysiga, madaxshubka, wallaca, waxay karahaysato, ka taxaddarka muxuu ahaayey: ahalku, ninka, aabbaha, abtiga, qaraabada, deriska, ahalka, waxaasoo dhan ay wada interesaareyaan naagtaas inta ay ka wada dhasho, ilaa ay ummusha ka baxdo. Shucuurka noocaas ah ama dareenka noocaas ah adduunka waa isaga mid, waana laysla qabaa. Waxaadna mooddaa wax lagu dari karo oo siyaada ah in ayna jirin.

**A. N.** Sida odayaashu ay sheegeen, horta magacyada meesha inoogu soo baxaan waxaa ugu horreeya: “wallaca”, waxaa ku xiga wax la yiraahdo “wallacjebinta” ama “bilayarada”, waxaa kaloo ku xiga waxla yiraahdo “jajabka” oo gabarta goortay gaarto uurka iyo bilood meelahaa uu mareyo iyo 5 bilood saleheda iyo meelaha kalxamaha ayaa indheheeda saa u jajaban ama u didilaacmaan ... yaad mooddaa, gabadha uur yeelata waa laga gartaa baa la yiri: Soomaalida, gabar mar uur yeelatay oo ilmaha iska disho, haweenka naagaha yaqaana way yaqaaniin jirkeeda la eegayaa, bowdadeedaa la eegayaa ama kamaheedatan laga eegayaa, waxaa la yiraahdaa “jajab” baaku dhacay, jirkeedaa saan u didiilma, marka waa laga gartaa. “Cija libaaxna” waa la dhahaa. Waxaa kaleeto jira wax la yiraahdo “ilma rogod”, waxaa jirta wax la yiraahdo “sindhoweyn”, waxaa jirta wax la yiraahdo “fooloo” iyaduna ka mid ah inta uurka ku jiro, waxaa jirta wax la yiraahdo “fool hallow” wax la yiraahdo oo “fool-diin” ayaa jira. Waxyaabahaas oo dhan ayaa la yiraahdaa. Aan ka sii gudbo, ilmihii way dhasheen, waxaad mooddaa Daahir Afqarshe iyo odayaasha inay sii qaateen. Markay ilmihii dhashay, ilmahaas sidee baa loo soo dhawaynayaa, kow. Mid waxaa soo dhoweynayaa reerkii baa soo dhoweynayaa, magac baa loo bixinayaa, waa laga qaadaalinaa, waxbaa laga eegayaa bal halkaas ... aan ku horreeyo Daahir Afqarshe.

**Aw Daa** Waad mahadsantahay, waxaa weeye, ilmaha marka uu dhasho waa qof soo kordhay, horta waa la wada jaclaysanayaa, marka la wada jaclaysto maalinta uu dhashay waa loo eegaa oo waa laga saaciidaystaa ayeentu waxay tahay. Halkan dadku waa ku wada duwan yahay, oo qaarna waa dadka kan mah luugaha ku shagaysta xiddigaha iyo waxa yaqaanee “cawa tiriska” ku shaqeeya. Dadna caadi bay ilmaha u yaqaaniin sida uu ugu dhasho todobada ayaanood yay siday u kala madaxsan yihiin ee loo kala saacido uun yaqaaniin, taa waa laga siman yahay, laakiin waxaan laga sinnayn tan habeenka uu dhashay cadaka loo tirinayo, bisha ayaanta uu ka galay iyo habeenkii magacii uu ahaa iyo saacaddii uu ka dhashay, waa shuqul dheero dadka qaar baa yaqaanno waa kala gaar, dadkaasi ma badna, caadada kalaa loo badan yahay. Markaa dabadeed ilmihii kolka uu dhasho wuxuu la imanayaa dabadeed soo dhoweyntii dee dhaqaalihiisa ahaa hoggiisi, walqashiisii, magacii loo bixin lahaa, howlahaa o dhan ayuu marka la imanayaa. Waxa jirta wax la bixiyo oo la yiraahdo ee “samaanyo” oo isna duca ah oo dadka qaar ay ku sheegeen shiikhii la oranjiray Maxamed Xanaf ee dadka qaar ay yiraahdaan Bucur Bacayr u yaqaaniin wiilashiisii yaa la yiri yaa “yuusuf Kownayn u jideeyay in la siiyo “qarshi” wiilkii dhashaba iyo naagta la guursado, kaddamboo caadadaas way inagu dareertay Soomaali way wada taqaannaa kulligeed in “samaanyo” laga bixiyo arooska iyo wiilka dhasha, gabdha kuma jirto. In kastoo nimankii ay markaa kororsadoo qiimihiina diideen oo ninba tankii ay ku arkeen ay yiraahdeen: “anigu hebelow wax caynkaas aan ahayn kaa qaadaan maayomo, hebelow awr baan kaa doonayanaa, hebelow kunka shilin oo caynka oo kale baan kaa doonaynaa”. Iyaguu kolkaa qiimihii dhugdhug isaga darsadeen. Qiimihiisu ahaa markii hor qarshigu marba qiimaha uu joogo ayaa la bixin jiray. Waa yahay. Maxaa markaa dad diida loo waayey? Waxaa loo waayay, waxaa dadkii citiqaadsan yahay xukunkii uu bixiyay haddii aad diiddo ilmihii masuubaa ka heleysa markaasadan akeyn, masuuba dhacday, la leeyahay: “sow tii uu qaataa ninkii magacaa... ilmihii”. Markaasaa ilmihii nuqsaan ku dhacday, markaasaa aabbihii lagu cayay oo la yiri “adaa waxaas oo dhan baasaha u lahaayoo ilmahaasoo bixin waayay samayihi iyo karaamadii shiikh Yuusuf Kownayn ayaad xukunkiisa diiddayoo masuubada halkaasay ka timaadday, taa weeye”. Taa waa laysku wada waafaasan yahay ninkii waliba soomaali ahiba waa ka bixiyaa samaayaha ilmaha dhashay iyo arooska labadaasba. Markaa ilmihiihawshii uu la yimi taa weeye. Ninkii ladnaaday ee Soomaaliga ahaa ee gabar u dhalatay waa ku darsaday nimankii imminka magaalada joogay oo yiraahdeen: “waa wiilka oo kalee” oo markaa qayliga dabadeed hooyadii marka iska naxdayoo, illayn waa hooyo waa naxriis miiranee, tirayoo waa gabadhayda oo markaa dee waxay doonto ka bixisay. Gabadhihiina imminka waa ku darsadeenoo dhawr gurubsi iyagu nimankii ay gurubsadeenee, wixii hore ee caadadeenna ay ahaan jirtay kuma ay jirto. Horta halkaa kharashkaa weyn ayaa ka yimaada. Ilmaha wixii loogu howlgalayaa ayaa ka yimaada. Ilmihii sidii reerkooda wax ugu mulkiyi lahaa durba ayaa yimaada oo xoolihiibaa wax looga Xuddun xiraa, oo hooyadii hadba ilmaheedi qiimo weyn bay u yeeshayoo, waxay tiri: “waa kan maxaa looga xuddun xirayaa?” Markaa dabadeed, maalintiiba haddaad reer miyiga qaalin kaa siiso oo waxay u jeeddaa, durba horta reerkii gurto dee, oo

ayaantay wiil dhashoo qaalin qaadato, ayaantay gabar dhashoona sabeen iyo ceesaan ugu xidho xoolihiiba xaggay u guurayaan sow arki mayso, waa “xuddun xidh”. Markaasaa dabadeed geelli, iyo sabeenihii iyo riyihii mid walba neef kaga xireeysaa dabadeed durba reerkii mulkiyeysaa sow ma arkid? Sida u kala xoola roonyihiin, wiilkii dabadeed isagu ha sii boobee waa xuddun xidh. Maalintii yarku tallaaba qabto ee: “waa taa garka ku qabta, ee dee qalin kale sii wiilka”. Ninka dabadeed caruurta jeclaa sida dabadeed loo xoodaaminayay xoolihiiba laga saaro, oo xoolaha odaygu isguraan, marka magaalo la geeyo ee, moqbuna laga bixiye ee, la iibiya ee, wax yaryarka ah aan la taabanayn. Halkaasay tafaariiq xoogeyo ka soo gelasaayo, wagar xoolihii caruurtii lihi ka buuxsamaa, wixii odaygu madaxnimo u lahaa ay meeshii ka madhaayo, dabadeed ayaduna, waa siyaasad guriga u soo hoyata oo, si qabow la doonayaa in qoyska qaar loogadhigo dadkii qani, qaarna looga saaro gacantoodi, xoolihii. Bal anigu halkaa ha moo joogo.

**A. N.** Waxaan u wareegayaa Ibraahim Fiqi Buraale, Ibraahim Fiqi Buraalow waxaad mooddaa in... uu isku noqnoqonayo, kow. Halkaa ilmihii waa dhasheen, ilmihii waa la sacabsaday, waa la soo balleeyay, samaanyana waa la bixiyay, samaayihiina marka la bixiyay. Intaa waa la bixiyay. Intaasaa lagu soo dhowaayay, maxaad ku dari lahayd?

**Fiqi** **I**ntaa waxaan ku dari lahaa sedkaa aad bixiseen ama samaanyaha. Soomaalidu waana isku dhaqan waana kala dhaqan. Waxaa jira marka la bixinayo sedkaa, dad wuxuu gooyaa markay qaadanayaan sedka waxa la yiraahdo “makaraan” oo dun iyo bay isku xiraan, magaranaysaa, bahal yar oo ay soo gunteen markaasaa ilmaha lagu xiraa calaamaddaas marka waxay tahay cawltirna waa tahay, nin bambana uusan reerka u imaanin waa u calaawad, oo makaraan baa la yiraahdaa. Qolana waxay samaysaa markay gobadhaas ama la guursado ooy gabardh tahay ama inan dhasho makaraankaa ma gooyanee way gabyaan. Gabaygaa markay tiriyaanna ammaan bay reerkaa odayga jooga u tiriyaan iyo gabadhaba ilaa jid jid, waxaad mooddaa inay abtiirsiinyahaas qofkaas inay ka badiyaan, halkaasaa wax lagu soo dhoweeyaa iyagana wax, baa lagu siiyaa, laakiin iyagu wax ma gooyaan, waa or. Waa kow. Horta labadaas howlood saasay u kala duwan yihiin. Waxaa kala oo jira markay gabadhu ummusho ama markaa la guursaddaba lahayn oo hore u jiri jiray dadku, wuxuu yiraahdaa: “Ummushu, waa ummul” baa la yiraahdaa waa loo diiqaa oo haweenka ay ahaayeen saxaabta ee isku xirnaan jireen ayaa u soo diiqa oo wax u keen wax la yiraahdo: “heblaa ummushay”, ummuldiiq baa la yiraahdaa. Waa kow. Xagga kan kale ee gabadhaas marka ka guursado waxaa la yiraahdaa “wa bilaa caws”, iyadana waa loo diiqaa oo mid rara u keenta iyo mid guursadaa. Halkaa waxaa laga qiiyaasay inyana waxba heynin.

Ilmahaas marka uu dhasho, haddaan u soo noqonno, sida Aw Daahir u sheegay, waa laba dabeecadood. Dad wuxuu eegaa magaca wuxuu u bixiyaa ilmaha dabeecaddiis, oo waad ogsoon tihiino, marka ilmahaasu dhalanaayo dhallinyaradu dulleedkaasay is tubaan waxay dhagaystaanoo bal inuu wiil yahay iyo inuu gabadh noqon doono ilmaha dhalanaaya in ay ka dhursugaan. Markaasaa ilmaha waxaa la doonayaa, wiilku markuu dhalanayo dhawaaquu la soo baxaa. Muxuu ilmaha dhawaaqaas la so baxay? Marka hore dugsi buu ku jiray calool buu ku jiray, waxba ma

arkaynin, markii bannaanka u soo baxay baa wiilkii dhawaaqaa, laakiin gabadhu ma dhawaaqdaa la yiraahdaa, oo taasuna waa gooni. Ilmihii markaas sida aad u sheegtay wax waxba la soo dhameeyay waxaa la yiraahdaa misna: "magac ba loo bixiyo". Magacaa loo bixinayo dad sidaas wuxuu eega xiddigahaa ama wuxuu eegaa kitaabka la yiraahdo falakig, ama waxay eegaan ayaanta uu dhashay yaa ahaan jiray oo samay u tahay? Nabigeebaa dhashay? Nabigeebaa magaciisa ahaa? Kee buu ahaa? Ayaantee bay tahay? Oo saasaa loo eegaa. Laakiin dadka reer miyiga aan ka soo jeedna wuxuu u badan yahay xilliga markaa jira iyo ilmaha dabeecaddiisa ayaa magac loogu bixiyaa. Bil matal magacyada aad maqasho oo taqaanno Bulxan, ama Qawdhan la yiraahdo, magacyada caynkaas ah waa dabeecaddii, mid waa waalan yahay oo had iyo goor qayladaas yaa loogu baxshaa. Mid waxaa weeye miyigaas ilma ku dhashay isago oo reerkii baa guuraayey waxaa la yiraahdaa: "hebla waa ummushay ha la joogiyo", bilmatal Raagaa la yiraahdaa markaa ma Nageeye yaa la yiraahdaa, oo geesta ducaa looga bixiyaa oo gees waxaa looga bixiyaa xagga dhaqanka. Nageeyahaa waxaa lagu siidaraa odayga iyo habarta yaa col ahaan jiray oo xumaan ka dhexaysay, wiil baa dhashay reerkii halkaas ku degay aa la yiraahdaa Nageeye, hadduu guuraayna waa degaa, fidna hadday ku jirtana way ka baaba'daa oo ilmahaasaa heshiisiya odaygii iyo habarti.Waa kow. Magaacyadaasaana waa loo baxshaa, haddii geeddi yirana... waxaa loo baxshaa magacyadaad ama Geeddi ama waxaa la bixiyaa carrale, taas waa tan foolbaxata. Hadday foolbaxseto oo seda... u ummushu, oo folhallowga ah waxaa la yiraahdaa Carrale oo ciidda uu ku dhashay baa la yiraahdaa, magacyadaas oo kuwa la mid ah oo dhaqankeenna hore aha ayaa dadku u bixiyaa, oo sida uu u dhalanaaya ayaa la eegaa, iyo maanta uu dhasho cimiladii markaa jirtay yaa loo eegaa. Waxaana u badan dadkaas xagga woqooyi ayaana magacaa badan, laakiin carabta iyo dadka la mid ma aheen ee reer magaalaha aha nooga soo horreeyay magaalada, reer xamarka la yiraahdo, dadkaas gibilcadka loo yaqaano badiba waxay u eegaan kitaabkaas u eegaane. Haddaba dabeecad baa bixisa ilmaha innaga dhaqankeenna, dabeecaddaa uu ilmuhu ku dhashay ayaa magac loogu bixiyaa.

**A. N.** Adaa weli watee, "sacab sinji ka adag, ballaysina dir ka adag" bal ii sharax.

**Fiqi** Waxaa loo yiraahdaa, ilmuhu markuu dhasho. Bilmatal naagta ummuliso "ummulisaa" la yiraahdaa, waxaa la yiraahdaa dabeecaddii qofkaas sacabiyay uu lahaa ayaa ilmahaasu yeelanayaa. Kaas kalee u yimi ee isaguna soo balleeyay waxaa la yiraahdaa: "ayaankii ninkaas ma cara badnaa? Ma nin taqsi xoolaha ku leh baa? Halkaana sideesaa loo yiraahdaa balleysin dir ka adag sacbna sinji ka adag, calashaan sinjigii hore oo qofkaas ka soo jeeday qaadan maayee wuxuu qaadanayaa istaantaas saacabisay ee ummulisay yaa la yiraahdaa Soomaalidu ku maahmaahdaa.

**A. N.** Aan u soo noqda ee Cali Mudiir, Caliyow odayaasha waad maqlaysay hadaladii qiimaha iyo qeeyaha badnaana, waaye-aragnimadii dhureedka ahay meeshaan ka soo jeediyeen, waxaan niri ilmihii waa dhashay, markuu dhashay waa la sacbiyay, oo sacabsi ayaa dhacay oo gabar baa qabatay oo dahatay oo waxaa la yiraahdaa dahasho "ama sacabiso". Markii uu dhashay waxaa jiraa wax la yiraahdo xuddun goyna waa niri, waxaa la

yiraahdaa “ibad bixin” ama mandheerta hooyada markay soo dayso.

**Fiqi** Eraygaa aan kugu dabo mida, magacyadii aan illabay, waxaa jira magac aan loo bixinin kal dhaqanno lagu bixinin, ee dabeecedna lagu bixinin, kitaab furna lagu bixinin, laakiin la yiraahdo “samay”. Samaygaas marka muxuu yahay? Waxaa weeye, waxaa lagu yiraahdaa Xaaji Axmed waxaan ku oranaayaa: “Xaaji Axmadow hadday afadaasu wiil dhasho magacaagaan u bixinayaa”. Markaasaa Xaaji Axmed u bixinayaa wiilka, haddana xajka ma tagin ogow, inankiina weligii wuxuu ahaanayaa Xaaji Axmed oo waa sami. Markaas wixii naagtaas inta ummul baxayso iyo dharkeeda iyo diiqaddaa adigaa qaabilsaan, inankana waa wiilkaa, waxyaabo wadiifadaada ku xiran baad noqonaysaa.

**A. N.** Waxaan joognay sacabsigii oo yarkii markuu dhashay oo sacabbada lagu qabtay ama la ... oo mandheerta laga soo baxshay oo xuddunta laga gooyay, xudduntii markii laga gooyay habartii way qabatay waa markaan loo faaninayo oo ballaysinka qofka soo balleeyay iyo gabadhiisaasaa loo eegayaa. Aan xoogaa gadaal ugu noqdo, ilmahaas markuu dhasho, ummusha habartu ku jirto oo iyadoo la xiriira Caliyow maxaad ka sheegi lahayd dhalashadaas siyaalaha jira?

**Cali M.** Mar haddii Aw Daahir iyo Fiqi Buraale iyo Axmed Nuur ay goobtaan ka hadlayaan waxaad mooddaa in la iiga waaya-aragsan yahay. Aniga horta qoys diini ah “*religioso*” ah ka dhashay, reer magaalna waa ahay, waxyaalka aad sheegaysaanna anigu waan idiinku raacsanahay. Marka ugu horreysa horta cunugga waxaa lagu soo dhoweeyaa hadday reer magaal yihiin ama baaddiya yihiin, horta haweenka markaa soo qaaday inta u dhow wey mashxaradaan, meelaha qaarkooda, ragga waa dhowraayaan oo marka wiilka meesha joogaan waa loo dabbaaldegaa, fardaha inta xaggaa xaggaa laga soo yaacsiyo waxaa la yiraahdaa wiilka nood iyo dabbaaldeg aa loo dabbaaldegaa. Magaca sida uu sheegay, haddii familkaas diini yihiin, sida carabiga iyo ambi yadii waxaasaa loo magacaabaa, hadday dadka Soomaali weyn tahay yihiina waxaa weeye dabeecada kolba uu ku dhashay ayaa loo bixiyaa, dib ugu noqon maaye taas. Laakiin guud ahaan, waxaad mooddaa Soomaalida keliya ma ahaa xataa adduunka marka dhaqankooda markaad akhriso inaan la kala fogayn ee araybixiinta iyo magaca iyo dhaqanka iyo afka uun ku kala duwan yihiin. Marka intaas ayaan ku dari lahaa.

**A. N.** Waxaa jira ilmuhuu markay dhalanayaaniin, Daahir Afqarshow, magacyo badan ayaa jira meeshaan Soomaaliga, macnaha annagoon ka tagayn, eraya af-Soomaali ahne waa loo baahan yahay oo meeshaa ka dhaca. Waxaa jira wax la yiraahdo “uurgurguurto”. Geel uurgurguurtaa loo geli jiray, waxyaalo uurgurguurtaa la siin jiray ummushu markay dhasho. “Dhiidi” wax la yiraahdo, riyaha “uub”, wax la yiraahdo “dhiiggayo dhalidda”, waxaa jirta wax la yiraahdo ummulbixin, naagtan sacbisaa ama... waxaa la yiraahdaa “ummuliso” sacbisana waa la yiraahdaa. Waxyaabahaas inoo kala saar.

**Aw. Daa** Idiin kala saaray. Waxyaalaha kanu, waa sidaa u sheegtaan, mid, mar horta, aan kuu yara laabto. Midayna marka hore illownay baan ku darayaa kuwa ayan marnay ka mid ahaa, oo ilmuhu markuu dhasho abida ama mandheerta waa la asaa. Haddii bahal la tago, waxaa la yiraahdaa “abidii baa bahal geelayoo ilmuhu dabeecaddaa ka soo baxda dabadeed aan loo

adkaysankarin, oo la yiraahdaa wagaasaa masiibo ku dhacday abidiisa bahal qaatayo, waxaa la eedeeyaa naagtii la doonayay in ay si fiican u aasto. Horta taas waa mid. Mid kale waa timaaddaa "walqasha" waxaa loo saaciideeyaa in nin cunto wanaagsan aa u dhadhamiyaa ilmaha oo hooyadaa aa u dhadhami yaa ilmaha oo hooya daaba loo oggoleyn, oo tiraahda: "hebel oo la doono ma aha ee ilmahay qof kale u dhadhamin maayo" oo waxaa la doonayaa nin jilbaha ah oo wadnalaq oo dhug ka siiya baa la doonaya oo u dhadhamiyo oo "waa hebel baa u dhadhemiyay" la yiraahdo, dabeecaddiisi buu raacaa, oo waaba aragnayoo qaaraan wan ba deeqayninoo la leeyahay: "kiin aan wanka deeqaynin baa dhadhamiyay" ... Reeraa lagu xaman jiray oo la wada ogyahayba, oo waxaa la doonayaa qof miskiin ah oo ma aragtay cadkiisa qaadan karin inaanan noqonin, waa la arkay. Waa yahay, kuwaas horta kuwaan soo marnay ka mid ahaayeen.

Ilmaha samaayihiisa horaan u sheegay, waxaa la yiri, ilmihii wuxuu noqonaysa sacsac, oo waxaa la oranayaa dabadeed, nimanka anigu magacood iska diidayaa, nimankii caynkaasahaa baa qaatay, "Yibir qaad" dhah. Waxaana sababtu tahay shiikh Yuusuf-ul-kownayn, hora u sheegayoo, ayaa xukuu riday oo yiri markii Bucur bacayr la yiri: "Khud yaa Cabdullahi" oo buurta uu ku jiro lagu qabtay, diintana lagu dhaliilayay, ninkana Max'ed Xanaf la oran jiray exiskiisuna uu Hindi ahaa, mid cilmi lehna uu ahaa, qisadiisana ay dhaartahay, Soomaali waxay rumaysan tahay maalintaa sh. Yuusuf-al-kownayn yiri: gabadha la guursadana qarisha ku leedihiin, wiilka dhashana qarshaa ku leedihiin. Qarshiguna marba qiimaha uu joogo inan ku xirno ayaa weligaa ahayd. Xoolihii imminka waa la kordhiyay carraday ka baten. Horan u sheegoo nimankii dabadeed waxay boobaan sheegtay. Haddii la waayo Xooli...tahayoo la diiday masiibada tan nimankan ay bannaanka iska joogo xoolaha dooneyaan ka inanayso war maxay baa la yiri? Shiikhaa karaamadiisii yaa laga baqayaa oo la leeyahay: "nin weli ah ayaad khilaaftay, xaq uu jideeyay, halka massibada ka dhacayso taa weliya, marka Soomaali min jimac waa isku raacsan tahay haddii samaanyaha la diido in massuba ka imanayso.

**A. N.** Tii aan kuu midmdaaye ilmihii waa dhashay, waa la qabtay oo waa la "dahay". Dahashadaas waxa dhacay, waxaa jira adiga oo waaya-aragnimadaada kaa shanayaa, kow, waxaa jirta mandheer, xudurgoyntii, abidii, guurguurtadii, waxa jirta wax kaleetoo la yiraahdo ee waxyaalahaas bal noo kala saar.

**Aw. Daa** Guurguurtadu waxa weeye, intaa kale oo dhan waa wada sheegtay ee, guurguurtada aan ka soo qaada guurguurtadu waxaan ku kordha hooyada oo aan si wanaagsan aan dhaacaanka uga imaaniin, dabadeedna, hadday dee magaalada la joogana waa la daweeyaa, haddii miyi la joogana waxaa ka dawa ah in maraa idaad la siyaa, kaasaa ka dawa ah waxa kaloo oo jiraa geedkan la yiraahdo ee asalka gaboolka shaah baa looga kariyaa. Geedkaas dad iyo xoolo wixii ummula oo dhan ee xanuun ku soo kordho, waa geed cudurrada la dagaallama oo kaasna shaabaa loogu karinayaa ayaa loogu daraa ummusha oo uu ka shaqeeya, xoolaha laftoode saas oo kale ayaa loogu daweeyaa, kuwi ummullaasigii wax caynkaas oo kale ahi ayku dhacaan.

**A. N.** Intaanaan Ibraahin u gadbin waxaad u fasirtaa gabadha iyo wiilku markay

dhashaan ee ilmuhu dhashaan si baa loo kala arkayaa heeraha u kala dhashaan si bay u kala arkayaan. Waxaan xusuusnahay heer caruureed ah habar wiil malaysanaysay gabar u dhalatay oo tiri: "fariidbaa dhalan lahaye nin baa foorari lahaaye, wan baan foorari lahaaye, ninbaa la ii fuli lahaaye maxaa fududoy ku keenay" bal geerarkan macnihiisi ii sharax.

**Aw. Daa** Kuu fasiray. Taas waa dhib yartahay. Sida aynu niqiinnay inta aan dadka waddamada noqonin oo dadka wada wax baranin oo wiilka iyo gabdhahaba labadooda qiimahooda la ogaanin, waxaa jirtay in wiilka la horreesiya, gabadhaha la aaso oo dib loo dhigo. Marka hooyadu waxay leedahay inta tan ee ayadu sheegtay in aan horta... horta timir... halkaa la ii dhigi lahaa, wan weyn aan ku riiq baxana waa la ii qali lahaa, caanaha geelana oo maalin walba wixii la ragaaba "was ummusha u geeya", waxaa markaan isku daldalo baa dabadeed noqon lahaa ayaantaan arooska ahaa oo kale oo diihaalku iga dhici lahaayeen. Gaber yar markaan dhalay baa dabadeed guriga layga tagay oo tii ummushayoo, dabadeed gabar gurigaba waa layga dhaqaatay. Odaygii ay wax la cuni jirtay waaba soo geli waayay... gabadhiina way karaahaysanaysaa oo wiilkiina waa iga maqan yahay.

**Fiqi** Horta taa waxaan ka oran lahaa, ee dabeecadda maanta jirtaa iyo tii hore way kala duwanaadeen. Gabadhaasu hadday wiil dhasho dee sidaasay u bar waaqowday, ninkaas qabaa ugu barwaaqayn lahaa, laakiin gabadhii, mid khayr leh Ilaaha baa og, laakiin ragga waa ka nexijiray oo waxaa la oran jiran qoro-tiris baa loo sameynjiray, waxaa la oran jiray inanku haddii 12 ba gaaro waa hanaqaad, oo ninkaasu gaashan wuxuu ku dhisan yahay ragga gaashaan qaadka ah. Marka waa ciidan kugu soo kordhay, laakiin gabadhii ciidan kuu kordhin mayso, halkaasaa ragga ku ahaa. Qiyaas ahaantuna had iyo gaar iyadu waxay u haystaa "haddii wiilka dhasho dee wanna waa laguu qali lahaa, aad baana laguu baanan lahaa, si wanaagsan baad magac u yeelan lahayd, oo dee reer... buu reerka ahaan lahaa" oo taa la yiraahdaa "saddex midna lala ma heshiiyo: minyaro masayrtay iyo micigabaarray mulkiday iyo nuddici markhaati leh, saaddexdaba lagama kacaan baa la yiri. Maxaa loo yiraahdaa?

Micigabaarray mulkiday hadday gabdha badan dhasho iyo wiilal badan dhashoo reerkeeda bato oo halkaa uwado, wax loogu guddi xiro iyo waxay ku guursadaan iyo waxay la safraan, odaygii dibadgaal buu noqonayaa, odaygii qiimo ma leh, marka waxaa la yiraahdaa micigabaarray mulkiday. Minyara masayrtayna dee meeshii laga doonayey in minweyntu masayrto hadday minyaradu maseerto halkaasna waa dhibaato. Haddii aynu eegno, islaantaa horta saasay, dabeecad kale kaga jirta oo taa u sii dheer, waxaa jirta islaantaa wiil jaclaysatay oo markay ummulayso misa markay gabadha iyo wiilka labadu aroos noqdaan. Markay dhasho waxay jacashayay in ay wiil dhashnay laakiin markaa labadaa wiilkii iyo gabadhiiba wada koraan oo wada guursadaan oo caruur wada dhalaan, habartii waa nacaysaa wiilka caruurtiisa, laakiin gabadhii caruurteeda baa had iyo goor qaadan oo kool koolinaysaa.

**A. N.** Ma waxaad leedahay, iga raali ahaada, Soomaali ... maah maahshan baa jirta "Soddohi" sin ka wataan.

**Fiqi** Taas waa nooc kaloo, taa waxaa loo yiraahdaa ninkii soddoh wanaagsan

leh dee waa reer dhisan, mana sed waayo, gurigiisuna ma xumaado, dhibaatana kama dhacdo oo ereygakan waxaa weeye reerkii waxaa dhisaysaa soddohdii wanaagsanayd, laakiin tu xun way kula dhagaysaa, wiilkii bay ka tegaysaa. Waxaa dhacda calaashaan, waxaa ugu wacan markaas aragto inankii markuu guursado oo habartii la dego oo hooyadii ahayd, naagtii wiilka qabay iyo habarta way calloobayaan. Habartuna waxay oranaysaa: "naagta fur". Maxay doonaysaa? Naagtatan wiilka qaba had iyo goor waxay ka dambeysaa ninkeedaee ka dambayn mayso habarta. Tan gabadha ah ee nin qabaana had iyo goor haberta ayay ka dambeysaa balankeeda iyo sheekadeeda iyo wax siinteeda. Had iyo goor waxay u owdaa gabadha.

**A. N.** Oo waxaad leedahay habarta Soomaalida gabarta markay dhalanayso way nacaybtahay, goortay kortana way jeceshahay, wiilka way ka jeceshahay. Markay dhalanayaana wiilkay ka jeceshahay, markay wada koraanna gabadhay jeceshahay saas aad leedahay. Aan kuugu soo noqdo, weli ku dayn maayo. Waxaad ku noqotaa dhaliddii, markii ilmuhu dhalanayeen waxa dhacay.

**Fiqi** Marka uu ilmuhu dhasho waxaa dhacaya. Horta waa laga dhursugayaa. Markii ilmihii uu dhasho oo la sacabsado oo naagtaas ay sacabsato arrimo badan baa dhaca. Waad ogsoon tahayoo dhaddigood oo dhan waxaa dhalayaa waa isku hal, isku mid weeye. Ama mandheer bay leeyihiin ama guubay leeyihiin mandheerta waa sidaas u noqon maaye waa sidee Aw-Daahir u sheegay. Hase ahaatee markaas mandheerta la soo bixinaayo wax ka dambeeya wax ka dambeeya wax la yiraahdo "guube", lugaha waa soo hormaraan waana dambeeyaan. Markaas ilmaha waa in xabka horta laga foorarshaa oo xabka laga sii daayo, haddii kale had iyo goor waa xuroomaayaa intaa. Naagtana guuboaha ka dambeeya haddayan soo wada dhammaanin marka horaba waxaa ka kordha cudur la yiraahdo guurguurto. Guurguurtadaasuna waxaa weeye... waxay ka kacdaa guubaha dilaaca, coloosha ku dilaacay. Kiibaa marka xinjar noqda, xinjirtii yaa caloosha marka ku guurguurta haweenkana aad bay u dilaan, laakiin haddii aan laga subagsiinin aakhirta dambe waxaa imaada "kadcad", kad cad baa yimaada kadkaa cad waad aragtaa, geela kad buu leeyahay, kadkaasuu isu baddelaa marka guurguurtadaan. Markaa iyadu waxaa laga yaabaa haddii uusan laga saarin guurguurtadaa sidii wax uur leh yaa calooshеedaas had iyo goor la guur guuraysaa oo saas u socsoconaya, oo waxa guurguurto loo yiri. Cashaan xinjirtaas ka timid xagga guubaha ayaa caloosha ku fariisataa. Markaas, iyadoo hadba marba ilmahaas uu dhammays yahay waa iska fiican yahay, laakiin ilmaha xuumaadaa waa marka uu yahay uuryaalka ama uurjiifka uu noqdo oo uusan aad u xoogaysan ama todoba ku dhalid waa kacaa.

Marka uur yaalka iyo uurjiifka labadaas waa dhicis, labaduba hadduusan kudhaleen dhicis, ahayn, laakiin hadduu siddeed ku dhasho ama wixii ka hooseeyo oo lix bilood uu ku dhasho labada midna ma kaco, cudur bayna haweenka ka qaadaan, iyagana waa in aad loo baantaa. Haddii kale waxaa laga yaabaa in ay ku ilmo guub taaba.

**A.N** Daahir Afqarshaan dib ugu noqonayaa. Daahirow ilmihii way dhasheen, waa dhameeyey, waynu ka hadalnay, markay dhashaan oo afartanka ay gaaraan maxaa dhaca? Bal afartankaas adiguna ka masalood.

**Aw.Daa** Ka masalooday, waxa dhaca in ilmihii intii ka horraysay waxaa loo siday dabar, labada lugood way isku marrayeen, markaa dabadeed afartanka uu nuugo yaa loo kala bixinayaa addimadii, oo misigta la saarayaa. Markaas waxaa la yiraahdaa "gardaadis".Gardaadiska haddii la heli karo, soomaalida fardaha leh waxay jeceshahay in ay faras dusha u saaraan ilmihii, faras iska taagan yaa nin sidaas guudka ugu saarayaa, oo xaggii saaciddadaa laga wadaa in uu noqdo nin fardafuul ahoo, nin ma garanaysaa, haybadda farasku leeyahay oo kale, waataa oo madaxnimaa laga wataa oo, ma aragtay, waa fooqfooq. Markaas dabadeed ninkaasna waxaa la yiraahdaa:"ninkii gardaadiyay waa hebel". Dadka qaarkiis waxay u yaqaanaan "bannaanbax". Waxa weeye dibad baa loo saaray Waxaana la yiraahdaa ninka loo dhiibaayo waa inuu yahay nin dhallinyaro ah oo xoog leh oo dheereeya. Waxaa la yiraahdaa "taw"iyadoo sinta ku sido oo doo celiyaa, ilmihii ayaantaas ayaa addimadii loo kala bixiyey, aqalka intaa lagu hayay dibad uma soo bixin. Maalintaana waa shuqul cusub yaa markaa meeshii yimid. Ilmaha inta aan anigu ka xasuusanahay waa intaas. Habartii iyaduna maantaa damaashaad, waa umul baxdayoo waa inay xinni iyo tuwaal isku dhufataayoo, dharkeeda kiigu wanaagsanna qaadataayoo, habeenkaa ilma doon kale.

**A.N** Seddex erey baa meeshaas nooga soo baxay, wuxuu ahaa: bannaanbax, gardaadin iyo kala qaadis. Saddexdaas erey ma isku macnaa mise waa kala geddisan yihiin? Waa isku macne. Sida anigu u aqaano. Ibraahin maxaad ku daraysaa?

**Aw Daahir** Horta waxaa weeye ilmahaas marka la soo banaanbixinayo ninka hamuun goroyada leh horta waa laga dhowraa, ninka fulahana waa laga dhowraa, ninka warka badan raacana, isku dirka badan lehna waa laga dhowraa, waa gardaadista. Waxaa loo eegaa nin dhan, oo dhamaantaasu maxay tahay? Nin deeq iyo dood iyo xoog iyo wax walba wax tar ah, oo la yiraahdo:"Alley lehe waa nin wanaagsaan yaa loo noqonayaa. Halkaasna waxaa laga saadinayaa ninkaas in uu noqdo ninkaas oo kale, oo saasaa loo saadinayaa. Bilmatal, waxaad xuusuusataa marka gabadha inanta ah la aroosaayo ee guriga la geeyo oo aynu joognay miyigeeni Gabadha, wiilna waa loo xambaariyaa, dhiil caano ahna way qaadataa, gurigey la gashaa. Waxaa loo saadinayaa inay tii wiilal dhasha ay noqoto, tii gurigeeda caano iyo barwaaqo ka maqnayn ay noqoto. Saasaa horta taa loo waxeeyaa. Waxaa kuu timid marka habartii, dhaqanka waa wax adag, marka islaantu waxay sugaysaa, mise dhaqankeeni hore? Habeenkaa inanka la gardaadiyay waa mayramaysaa oo dharkii xumaaday bay iska xooraysaa, oo dharkii ugu wanaagsanaa bay hagaajinaysaa oo gurigay uunsi ku dhufanaysaa oo gogoshay kala baddalaysaa oo waa indha kuulanaysaa oo, waa cusburanaysaa oo. Dee maxay sugaysaa? Wadaadkeeda in uu yimaado caano, waa ilmo doon kale. Laakiin dhaqankeeni markaan dib ugu noqonno, waxaa la diidi jiray inay caruurtu isnuug noqoto, oo waxaa la oran jiray ilmuhu ugu yaraan labo sano ha kala weynaadeen. Waxaa laga yaabaa markuu labo sano foodda geliyo naaska laga ma goyn jirin, oo waxaa la oran jiray seeda qaalibka ah, naagtu inuu ilmuhu nuugayo caado ma hesho. Laakiin qaar baa jira iyadoo la nuugayo uu helaa. Marka ninkaas labadaa sanadood wuxuu ku dadaali jiray inay naagtaas uuraysan, oo is ilaaliyo sida caruurtaas u kala koraan ayuu ilaalin jiray, oo

dhaqankeennay caan ku tahay. In kastoo hadda ay sagaal sagaal bilood ay u dhexeeyaan caruurtii, taasna dhibaato keentayoo cudur aan bixin iyo dhimatiyo, hadduu Alle idmo, dhibaata badani ay meeshaas ka timaaddo. Taasna waa meel.

Marka gardaadiskii haddaynu dib ugu noqonno, waa sidaad u sheegtayo, waxa weeye wax la yiraahdaa bannaanbixin. Halla gardaadiyo, gardaadintaas waxa weeye ilmihii sow saas dabran ma ahayn oo saas looga qaadi jiray, marka dambe si fiican bay u xambaarayaan. Labadiisii lugood ogaa la kala bixinayaa, ama dhabar ku qaado ama xaggaa ku qaad. Hadday xagga dhabarka ka wadaanna……. Calooshana way ku qaadaan labadaba laakin gardaadin haddaad maqasho waxa weeye bannaanbixintaa iyo ninkaa loo saantay iyo reerkii oo maantaas la cunayo, naagtiyo biskootay, reerkiyo calashaan qada wanaagsan la karinayo, arrimahaasaa dhacaya. Markaasa, mar mar, waxaa la yiraahdaa:”inanka ha laga ilaaliyo”, marka ilmaha dibadda loo soo bixiyo, ninka saa loo horseedayo waa wiilka, waxa jiraa geedasare. Geedahaa sare maxaa la yiraahdaa? Waxa weeye bahalka aanu niraahno “aboodi”, haadde, haadda noockastaba ha ahaatee yaa la yiraahda ilmaha haddii hooskiisa maro ….. ilmaha hanuu Qaadaa. Hanadaas marka waxaa weeye madaxaasaa dildilaacaya. Haweenka markaas waxay sameeyaan dhir bay soo tumaan, dhirtaa intay soo tumaan bay barida ku waxeeyaan markaasa madaxa loogu dhoobaa, anigu geedka magaciisi ma aqaano. Markaas waxaa weeye marka la soo banaanbixiyo sanafka laga dhowrayaa, calaashaan in uu wax saniyo, wax uriyo. Waa kala labo oo marka guriga joogana wax urintaa laga dhowraa, markuu bannaanka joogana harka wax dusha ka mara, haaddaa laga dhowraa, waa aboodiga. Weli meel uu fadhiisto ayaa jirta oo xaar ayuu dhiga, lama mariyo, lama ag maryo, laakin haddii nabarkaas dhacaba geewaa la doona isagaa la soo qaadaa, isagaa biyo lagu daraa, markaasaa la budeeyaa markaasaa madaxa loo marshaa. Haddaba marka urinta dhowrayo waa marka guriga ku jira oo uusan weli bannaanbixin uusan gaarin oo la yiraahdaa:”naagta qasliga qabta, ninka qasliga qaba soo… uu uunsatay hadduu uruyo durba waa xanaansanayaa, waa shaas hoonayaa baa la yiraahdaa, shaashow aa la yiraahdaa.

**A. Nuur** Waxay ila tahay warkeeni maanta halkaasaynu ku soo koobaynaa, waayo aad iyo aad aynu u dheeryahay….. Mowduuciina waxaa inoo ka hary saddex baa inooka haray: cudurrada ku dhaca caruurta oo laga ilaaliyo inta yar yarka yihiin ee ay korayaan iyo ilmuhu marka ay dhashaan ilaa ay ka weynaanayaan magacyada ay la baxaan sida ay dadku u arkaan…. Sida loo barbaariyo iyo sida loo koriyo, labadaa qodobyaa inoo haray. Waxaa kaloo inoo raaci doona inoogu xigi doono, heesaha caruurta. Waxaa halkaan, gardaadiska dib ugu noqonayaa Cali Mudiir.

**Cali M.** Horta gardaadinta, gabdhaha iyo wiilashaba waanu gardaadinaa. Sida u sheegteenna gabar hadday tahanna qof fiican, sida la yiriba ……… ooy la socsocoto oo bannaanka u bixi so oo waxay tiraahdaa:”saan yeelay yeel, saantayda qaad” Waxbay tirisaa, wiilkana sidoo kale nin dhan oo ka midka ah familka oo cisaanoo weyn ayaa qaada, isagana sidaasuu akhriyaa:” saan yeelay yeel, saantayda qaad” yacnii i raac weeye. Cudurrada yaryar ee ku dhaca waxa loo samaaya waxaa ka mid ah. Annaga waxaanu leenahay gaad la yiraahdo malmal, hedi iyo aanu leenahay ilmaha la

mariya, waxaa urka oo dhan ayuu ka celiyaa. Intay u mariyaan xoogaa malmalkaas hedigaas, intay good ku xiraan inta looga xiraa. Waxay kaloo sheegsheegaan jinni yaa maro, oo naagta inta umusha ku jirto bir bay qaadataa, maarta ayaa loo xiraa, lugtaa looga xiraa ama gacanta, urka iyo jinniga iyo waxaa ayuu ka ilaaliyaa baa la yiraahdaa waxyaalkaan oo dhan ayaa la sameeyaa, reer magaalka iyo reer miyiga labadaba.

**A. Nuur** Aan sii wadanee, waxaa jira cudurrada caruurta ku dhaca, intaynen u gudbin labada godobood ee kalooto cudurrada caruurta ku dhaca aad iyo aad bay u badan yihiin, anigu aan soo dulmaro saad u xusuusataani ood uga dooddaan. Waxaa jira cudurka la yiraahdo shubanka, waxaa jirta cudurka la yiraahdo matagga, waxaa jira cudurrada la yiraahdo xiitoxiito ama xiid qaadashada, waxaa jira cudurro noocaas ayaa jira, bal aan ku horreeyee ninka la yiraahdo Daahir Afqarshe, Daahir Afqarshow maxaad cudurrada caruurta ku dhaca intay yaryar yihiin oo dhabta lagu hayo ama dhab kujika inta ay yihiin ee cudurrade kudhaca, markay dhashaan ilaa dhabku jirka cudurradaa maxaad ka xusuusantahay? Seebaase loo gartaa?

**Aw.Daa** Cudurradu waa badan yihiin, oo waa waxa dabadeed caruurta yar yar cusbataalka lagula yaacayaa oo meesha wadaad joogo loogu daweynayaa oo alaaba kale loo raadsanayaa. Xooga markii loo taag waayo miyiga loogu saarayaa iyagoo  dhaleen. Markaa caruurtu iyagu waa wax yaryaroo daciif ah oo aan xamilayn waxyaabo dadka ka waaweyni hawlo uu qabsan karo ama uu kuba shaqaysan karo yaa, illay ilmihii wax yaroo daciif ah weeyee, aan xamilaynin. Markaasuu halkaa ka qaadanayaa. Matalan, immika waxaa ..... qof baa u soo gelayaa aan nadiif ahayn riixii uu ka qaadanayaa ilmihii halkaasuu ka xanuusanayaa. Waa la arkay ilmihii oo madaxii jeexjeermay ama isdhafaya ama bararayoo khalaas yahay. halkaa waa lagu kala duwan yahay oo, maantatada Banaadir haddaan imminka kaga sheekayo dad badan baa kaa yeelen oo yacni “xagguu ka keenay”? Soomaali weynna aan magaalooyinka joogin, ilmaha haddii qaslad loola soo galo ilmihii haddii alla ka kiciyana dhibaatuu ku kacayaa, markiiba madaxii buu dildilaacayaa, kolkaasaa la oranayaa:”jirraaba loola soo galay”. Mar kale waxaa laga yaaba in ay ku kala geddisan yihiin magaaladatan weyne dadku tirada badan lehi hugufkiisi ilmaha intuu ku dhasho isbitaallada iyo waxaa, oo uga timaado riixa ka qaadanayo, amase naagtii ka umulisay iyadoo aan markiiba nadiif ahayn, oo markuu dhashayba uu riixaa la dhashay, laakiin kii naagta musalliga ka dhalisay ee magaalada joogee ama miyigaba ee hooyada goonidis aadday weeya marka riika loo soo galo, kolka uu dareemo dabaashatan urka u qaaddo markaa isaga naqanayaa ama la leeyahay:”ilmihii qaslad baa lala soo galyo go’iyo wax kale ...... o xaggaan laga rumaysan yahayoo la diidi karin oo qofkii la yiraahdo waxaas ma jiro kuma yeelayo, oo oranaya:”oo adigu xaggeed ka keentay?” Gafka halka kan joogana kuma yeelayo oo oranayo wax jira ma aha, waa laba arrimood oo kala geddisan oo labadaba ay joogaan Soomaaliya oo labadaba la arkay oo lana caddeeyey, reer magaaladana wax badan soo aruurisay. Matalan, waxaaba laga yaabaa naag aan islaamba ahayn oo hadday doonto marna xamaydha marni inta kale baar la gashaa oo iyadu weligeedba aan qaslad ka mayranin, hadday umuliso ilmihii waxa u adkeeyeen taas ugu horreeyey ba ay taa tahay

ilmihii wax ba dareemi maayaan, laakiin, tii kale ee dabeecadda horan u soo sheegay wadatay ilmihii ka umulisay aan isku caqli ahayn, laba dabeecadood oo kala duwan ay tahay. Maxaynu marka soo qaadnaa. Matalan: Nin oday ah baa yimid, wiilkiisa oo la yiri wiil baa u dhashay, labadaa aqalna isku dhowyihiin miyina joogna yuu subixii geel ku soo wareegoo umushiiyo caano loo lisayoo, markaasuu yiri:"War wixii shalay soo dhastay caano hagu lisinee ka tuuro guriga". .... "Ma wiilkaad awoowe u ahaydoo wiilkaada dhalay oo shalay dhashay yaad leedaha hala tuuro?" "Haa, maxaa lagu falayaa caqiiba ma laha ee?" "Oo maxaad ku aragtay?" "Labadaa aqal saasay isku nabanyihiino, aqalkaba kama bixinoo ilaa shalayto, in yaroo oohin ah laguma arag" buu yiri. "Adduunyada aan joogi jiray" buu yiri "wiil caadadiisa lagu ma yaqaano in uu iska aamuso, ilaa shalay ilmaha yar ee aan oohiin lagu arag muxuu "kaga duwan yahay wiil....?" Sidii buu noqday wiilkii caqiib ma yeelan. Markaa raganimo lagama eegaynee abuurta, ninnimada ku abuuran baa noocaa ah, kolkuu ilmuhu dhasho inuu wiilku qayliyo waa caado, gabadhuna iska aamusantahay. Caadada raggaba lagu yiqiinay, haddii laga la'yahay doqon weeye. Wiilkii baa koray hadduu noolyahay waa sacsac aan lagu ogeyn wax caaqiiba ah...waa tii la leeyahay aad isku dhashay. Waxaan aad arkaysaan waxay wada leeyihiin wax ka wada dambeeya oo la soo jirrabay oo waa wax soo socday, waxan aayna ka shaqaynayno oo dhami wax dadkeenni hore la socday waa wax meel ku wada xiran cayaar ha u qaadanin, waa wax la hubo weeye.

**A.N** Daahirow waxaad moodaa in uu xoogaa warkii naga dheeraaday oo warka naga baahay. Waxaa jira wax la yiraahdo shuban oo caruurta ku dhaco, waxaa kaloo jirta hanjaleelo ee matag ama hanjaleelo. Matagga iyo hanjaleelada waad inoo kala saaraysaa, waxaad inoo kala saaraysaa shubanka iyo waxa keenay in uu dhaco.

**Aw.Daa** Waxa weeye, mataggu iyo hanjaleeladu waana isku mid waana kala yar yeryihiinoo, ilmihii oo caano lagu dirqiyay weeyanoo, marna waxay noqonayaan xanuun weyn hayoo markaasuu soo daynayaa caanihii, oo waa matag, marna in yar ka imanayaa oo markaa hooyadii ka bi'maysayoo oranaysaa: "matag ma ahee waa hanjaleelo" oo labada caanayow ee ka yimid ee kala yar iyo hooyada labada magac u kala bixisay.

**A.N** Aan u wareego Ibraahim (Fiqiburaale). Ibraahinow shubanka bal adiguna ka warran.

**Fiqi** Kaaga warramay, horta marka uu ilmuhu dhasho arrimo badan ayaa lagula kacaa, arrimahaa badan ee lagula kaco: xulbadda iyo malmalka iyo maarta la yiraahdo baraarug oo qoobka loogu xiro ama gacanta loogu xiro, intaas oo dhan waxaa weeye wax haweenku ay sameeyaan oo malmalkaasay mariyaan, waxay kaloo u xiraan intay maro yar soo qaadaan ay halkaas sida qardhaas ahaaneed uu xiraan, markaas oo ku guntaan bahashaas la yiraahdo, muxuu ahaa, xulbadda ah. Waxay kaloo iyaduna sameeyaan ee malmalkaas isaga ah intay qaadan oo sameeyaan bay halkaa ku waxeeyaan. Xilddiido intay qaadaan bay badiba waxay u mariyaan qoorta, markaasay madaxana marshaanee. Halkaa madaxa, inta harada ka korreysa, halkaas dhaqdhaqaaqda ayey halkaas u mariyaan. Intaa soo dhan waxay ku dadaalayaan yayn wax ba u dhimin ilmahaas oo waa nooc gooni ah oo iska gooni ah. Waa kow, waxaa jira iyagoo aan caruurta ayan

matagin oo yan hanjaleeloonin inay yara hee misna ay dibiraanoo ay markaas waxba ka imaan waayaan, waxaa la yiraahdaa “eeddaeedda” eeddaeeddona. Markaasaa naag eeddo ugu beegan loogu yeero, markaasay maradeeda ursiisaa, halkaasaa mankii ilmihii dibbiradu ka baxaysaa, wuu ladnaanayaa. Eeddoeeddowgaas, waa kuwa “ciic” yiraahda oo saas isujejebinayo eddoeeddow baa la yiraahdaa. Waa kow, waxaa la yiraahdaa, mid kale, oo xirribasho la yiraahda oo indhahaas yaa shuuqa, markay indhahaas shuuqaan waxaa la yiraahdaa, waxaa ku joogsaday diqsi markaasaa indhuhu yarahee bararaan. labadaa can baa laga sarsaraa markaana, oo haweenka ka sarsaraan. laba iyo laba ayay ku dhuftaan. Taasna halkaasay ku baxdaa. Waxaa kaloo markay yimaada labada hanjaleelada iyo matagga islaantaa caana badan oo waxaa dhacda duray baa ku dhaca markaasuu cabburaa ilmuhu. Maxaa cabburkaas ka yimaada? Cabburkaas wuxuu ka yimaadaa naagtaa, waa kala naas waa weynyihin hooyadu, mid baa naas yar midna waa naas weyntahay, waana la kala badiyaa sida xooluha oo kale weeye. Mid baa naasaheedaas oo badiya naaskuna weyn yahay ayaa afku u gelinaysaa, markaasuu sanku ka cabburayaa oo yedoo markaas qof u sheekeyneyso oo sankaa gelayaa oo caana halkaas ka soo matagayaa. Qaar naba sankaa loo saaraya naaska ku ballaarta ilmaha oo halkaa ay naftu ka dhacdaaba. Waa kow. Xanjaleedada waxa weeye laba noocuu ku keenaa, marka la habaayo yaaba laga yaabaa in uu saxdo ilmuhu. Markaa uu saxalo naaguhu waxay sameeyaan intay saasalaaxan bay misna afuufaan, oo markaa dushiisa saa u hufaan, markay hufaan “shifa, shifa” yay yiraahdaan. halkaa waxaa ka yimaadda xanjaleelo iyo matag yaroo isku jira yaa hakaa ka yimaadda oo waa ku seexday bay yiraahdaan. Waa kow, midna isagaan waxba cabbin oo aan afku waxba ku haynin yuu iska hanjaleelooda oo candhuuf saa iska imanaysoo iyo dhareerku. Marka sidaas hanjaleedda ay ku timaaddaa, noocyadaas baa loo kaladuwayaa. Shubankii baa markaa dhacay......

**Cali Mu** Horta hanjaleelada midkaad tiraahdaan anagu magac kale ayaa u naqaanaa:”dilig”. Marka diliga iyo hanjaleeda waxayaasha keena waxaa ka mid ah: cunugga markuu naaska nuugaayo wuxuu la caba dabaylama “aariyo”. Habarta fariidka ahi markay naaska nuujiso kabacdi saan intay u qaado inta saarto oo dhabarka saas ka tiraahdaa.......... wuu daacdaacdaa “aariyada” ka naxda. Haddaan “aariyadaas” laga bixinin cunugga waxaa ku dhaca wax la yiraahdo nakhsi, “aariyaa” ku jirta cunugga luguhuu taagtaagayaa wuuna matagayaa, cudurro badanaa ka yimaada. Habarta fariidada laakin markay naaska u dayso “aaryadu”...intay inta saarto ay boodboodisaa. Markay boodbootiso oo ariyada ka bixiso oo daacdaacdo cuniigaas diliga iyo dhibaatadu way yaraanaysa. Laakiin habarta doqonta ah aan aqoonin “aariyadii” uu la nuugay, naaska uu la nuugay ama geedka kaleeto ee ..... uu la nuugay, dhaloocaanaha ah markii la nuugay “aariya” gelaysa, naqsi baa la yiraahda, dabeelaa geleysa, dabeeshaana haddaan laga saarin cunugga matag iyo mashaakil ma huraayo. Waxaana lagu garanayaa lugaha soon u taag laagaa:”ciic-ciic” uu yiraahdaa. Marka diliqaan niraahdaa, hajaladaasna waa niraahdaa, waxa ugu wacanna waxa weeye habarta fariidda ahu waa in ay ka bixisaa “aariyada”.

**Fiqi** Waxaa kaloo intaa ku darayaa, waxaa jira cudur la yiraahdo “garabow”.

Garabowgaasna wuxuu ka yimaadaa caruurta iyagu, waa iska carjow oo kale, marka labada garab saa loo qabto, oo aan si wanaagsan loo qabanin, waxaa isku noqda labadaas. Garabow baa la yiraahdaa waa laga daliigaa markaas. Inta la mariyo xildiidaas oo subag ama sixin ah ama bari calaashan lagu waxeeyey yaa markaas saas loo mariyaa “masaaja” ahaan. Garabow aa la yiraahdaa, garbahaa ku noqda. Cudurkaa garbowda la yiraahdaa labada carjowda intaa labada garab ah, dhexdooda, garabkaas carjawda sidaas... habar sida loo bixiya taqaanaa garabkaa carjawdiisa yay saas u galaysaa sida muruqii oo kale, cudurkii markaasuu ka baxayaa, waa muruq bixinaysaa. habartii oo diliqda ka bixinaysay oo kale ayaa kudaankudinaysaa, markii ay kudaankudisaa diliqdii ka baxaysaa oo ariyadii ka baxaysaa.

**A.N** Waxaynu ka hadalnay wax la yiraahdo: shubanka iyo waxa kan la yiraahdo matagga iyo diliqowga iyo hanjaleeladada oo, intaasoo ereyo isu dhow dhow ah. Waxaa kaleeto jira oo halkan yaal “xiiqdheer” ama qufac ama “uh” la yiraado ayaan moodayaa. Iyana waanu ka hadli doonaa. Waxaynu ka hadli doonnaa waxa kan la yiraahdo ee bal hadda aan u noqdo Aw Daahir ee qiixdheer, magacyada loo yaqaan iyo say u timaado cudurkaas qiixdheerta la yiraahdo ama “uhda” la yiraahdo ama “kiixda” loo yaqaanno.

**Aw.Daa** Anigu waxaan u aqaanaa “kix”, dadka qaarna “xiiqdheer” wuu yiraahdaa. Markaa waa qufac oo ilmihii ku dhacay oo markaa ku noqday oo u badan magaalooyinka. Waxaa lagu sanceeyaa, , miyiga marka la joogo, ilmaha waxaa loo raadiyaa maraq bakayle. Bakayle hilibkiisaa loo kariyaa. haddii la kabbosiiyo waxaa la ogaaday waa cudur kaga ladnaadaa ilmo. Markaas waa xanuunka kan dadka waaweyne ee markuu ku dhaco la yiraahdaa ee neefta noqonaya ee neeftu “iida”, ma aragtay, waa la kala weynahayoo, waasa kala quwad weynyihiine, waa noocaas uun. Dawada aan u aqaano waa taa. laakin wax ay ka kacdo marka hore kuuma sheegi karayo, illeyn waan ka ilaalin lahayn innaga caruurteenne, ilmihii uu gabo baynu aragnaa, waasa kala dadaalilahayn.

**A.N** Fiqi Buraalow maxaad oran lahayd?

**Fiqi** Horta cudurkaa isaga ah magaciisa “kix” iyo xiiqdheer iyo “qix” iyo “uh” afartaa waa loi yaqaanaa. Markaas dhawaaqooda baa kala duwanoo cudurku waa uun isku mid ee dhawaaqii baa kala duwan. Marka “uh, kix, jix iyo xiiqdheer”. Xiiqdheertaa markaa waxaa looga bixiyay waa laba nooc. Waxay yiraahdaan bahashatan xiiqdheerta asalkeedeba miyiga horta waxaa laga yiraahdaa hinjibiso, hinjibisuu ka yimaadaa. Hinjibisadaasuna waxaa weeye bahal dibilaxaha ka yar yar oo xoon ah mir ka hora, mirkaas ka haraa wuxuu samaynayaa meel buul ah buu guriga ka samaystaa. Marka buulkaas uu samaysta yaa waxaa ka soo dhaca baa la yiri wax sida carro oo kale ah. waa kow. Ama waxaa ka soo dhacda markuu wax samaynaayo wax sidii siigo oo kale ah. Marka miyiga waxaa la yiraahdaa bahashaas waxay ka timaaddaa hinjibiso, dundumooyinkayna u badantahay, ama idaha ayaa qaadiya ama dadka waaweyn, oo idaha neeftood ayuu ka yimaaddaa. Magaaladana wuxuu ka yimaaddaa baa la yiraahdaa “boolbaraha” kacaya. Bil matal naag baa soo gashay gurigii suuqa dhan bay maraysay, dhul badan bay soo martay, huguf bay leedahay markaa. Hugufka ay soo gelisay ilmihii .... sanka ka galaysaa. Halkaasay ka timaaddaa baa la yiraahdaa, markaay xiiqdheer ku noqotaa.

Marka waxaa lagu daweeyaa baa la yiraahdaa sagaarada horta waa loo badiyaa maraqeedu, dameeraha caanohooda waa loo doonaa, fardaha caanohoodana waa loo doonaa, bakaylaha maraqiisa waa loo doonaa. Dadbaa waxay sameeyaan, haddii ay heli karaan bahashatan la yiraahdo “sheri brand” ee khambriga ah, dadbaa intay soo qaadaan ama “wiski” intay macalgadda yar ee gibinta ah ee kafeeda lagu waleegiyo, intay soo qaadaan yay “tibig” kusiiyaan, markaasay tibig yaroo buja ahna siiyaan markaas afka u gelshaan. Taana waa lagu sancaayaa oo anigu waan ku sanceeyaa. Hadduu qofkana calaalis yaqaannana, ilmuhu calaalis yaqaanna canjeerada iyo saliidda ayaa laysku badshaa, markaasuu goortuu cunuu Matagaa, wixii halkaa fadhiyay oo dhami waa soo dhaca. Taana waa lagu daweeyaa. Waa hadduu ilmuhu calaas yaqaanno oo uu wax cuni jiray weeye, magaranaysaa, shan jir, lex jir meelahaas jiro. Haddaba waxa dadka waaweyn u adkaysto ayayna caruurtuu u adkaysan karin oo waxaa la yiraahdaa, bilmatal, waa tan la yiraahda caruurta, xoola la yiraahda: “cerrab cad iyo caloola madow”. Marka carrab cad wixuu ilmihii waxba uma adkeysan karo, maxaa yeeley baacuugdooda caano waxaan ahayn wax kale kuma dhacin, calool madow waxaa la yiraahdaa wixii, magaranaysaa, ama ceesh cuna ama caws cuna yaa la yiraahdaa,. Markaa carrab-cad mar hadday tahay. Wax badan oo dadka waa weyn u adkaysto ayayan caruurtu qaadi karin. Marka taasna waxaa ka ilaalin karaa, Ilaahay amarkii moojiyee, naagta gaarida ah ee aad u hufan ee hawlwadaagga ah yaa ka ilaalin kartaa ilmaha yar.

**A.N.** Cali adigu maxaad ku dari lahayd arrintaax?

**Cali** Bahalkaan xiiqdheerta la yiraahda horta sidiisaba waa cudurka adduunka dhan laga yaqaano “sucaaldiiki” baanu niraahmaa. Cunugga marka naaska uu nuugo oo habarta naaskeeda nuugo, si …… u yimaadaa, aad uguma dhaco waayo habarta caanaheedu “quantity” ama taya badan uu ka calinaya ayuu leeyahay. Haddiise habarta naas keeda uu ka guro ilaa uu siddeed, sagaal, ilaa cunugga markuu nuugaayo inta ka u dhaxeeyso horta ku dhacaa, wixii ka weeyo kuma dhaco. Bahalkaas sucaaldiik baa carabiga lagu yiraahdaa, magacyo kale ayuu leeyahay, waa la tallaalaa, waa la beeray, waa la ogaaday jeermigiisa, dhibaatadiisa, wixiisa waa la ogaaday. Waxa weeye bahalka kan ow hadda jaalle Faqe uu sheegaayo anagu hinjibiso …. Waa kala gaddisan yahay. Annagu magac kalaa u naqaanna, huyumisada annagu magac kalaa u naqaanaa, suu u yimaadana ishuu ku dhacaa, afkay gelisaa, bahalbaa kugu tuuraayo kugu saynaayo afkana waa kaa geliyaa, sankana waa kaa geliyaa. Isha haddana kaaga dhaco, isha dhammaan bararaaya, afka … qofka waa matagaaya, dhibaato, sida xiiqdheerta weeye, laakin waa kala gooni, waa kala gooniyoo huyumisada tan keena, cudurka keeno qiiqdheerta camal oo indhaha kaga beeliyo iyo qiiqdheertu waa noo kala gooni. Kan annagu dadkaas inala yaqaana adduunka ma naqaano, laakin kan waa “internationel” carabi weeye, cunuggana intuu yaryahay waa laga tallaalaa, laakin midka ugu wanaagsan waxaa weeye malabka iyo sida uu sheegay bahalka ee “shal brandi”ga “wiski”ga iyo ayaa la siiyaa. Xabadka dhan baa isku laxaaya xab iyo waxaas.

**A.N.** Si fiican baad u balbalaariseen, u sharraxdeen ku dar maleh wax ka dhimidna ma Cali. Waxaa jirta cudur la yiraahdo dabayl ama jan jamaraac

caruurta ku dhaco oo lafuhu dhuudhuubtaaniin, cudurkaa jamjamaraacka ah ama lafa dhuudhuubadaka ah, maxaad Daahir Afqarshow ka oran lahayd?

**Aw. Daa** Waa nooc dee cudurradaas dadka ku dhacaa oo waxay ka yimaadaan … waa cudurka marka u horreeya ee ilmuhu aynu ka soo hadlaynay markaa dhashay ilaa afartanka dabaysha laga qarinayay waxaa waa dabayl, riix uu ka yimid. Markana, hore, ilmaha waa taas hooyada iyo aabbuhuuba inuu quwadaysto marna loo qarinayay, marna loo naaxinayay. Marna hooyada quradda loogu yeelaayay uu caanaha ka joogeeyo. Markii dambee markaa magaala iyo waxa la yiri yaa markaa meesha waxaa soo galey xiiqbiciirnimo (?), marka quwad yaraanta halka dadka uga soo dhuumataa. Dabadeedna markaasay halkaas uur ka qaadanaysaa. Markaa haddii cosbatal iyo laga gaarin iyo dhaqaale sara loogu qaado, waa tan qofkii, dabadeedna, dee baabi'inaysaa.

**A.N.** Ee Afqarshe waa lagu maqlay, waxaan leeyahay ee Fiqi Buraale! Cudurkaan dabaysha ah ama Jamjamaraadka ahoo qofka luguhu dhuudhuubtaan oo socon waayey oo magaciisi ku dhacaanin, maxaad oran lahayd?

**Fiqi** Horta cudurkaa isaga ah, waxaa jiraa, "Fiqi" baa la yiri "loo sheeka xumeeyaa waa dhaxal xumaystaa". Markaas horta cudurka kaasu markuu caruurta ku dhaco, gaalada ruuxeeda, caruurta ruuxeeda wey eegtaa oo waxay yiraahdaan, odayaasha wey eegaano caashaan culimadu waxay yiraahdaan: "waxa weeye riix baa ku dhacay" waa kow, riixul axmarkaasu waa maxay? Waa dabaysha oo horta dibedda loo saaray waa ceenkakan wadaaddedu saasay yiraahdaan. Gaalada ruuxeedu waxaa weeye bahalkaas, cashaan …. Waa "baralis", xididda joogsada weeye, ama wuxuu ka yimaadaa. Waxaa jiraa, bilmatal, caruurta noocan kale weeye kuwa majadhuudhuuban baa jira oo calooshu weyn tahay, laakiin taas ruuxooda ma jajabinee waxaa jira bahaal goryaan la yiraahdaa, goryaankaas isagana wuxuu ka imanayaa caana aan la karkarin aana qaboobay, sidaadda intay u xumaadeedeen naagaha qaar baa iska siiya … waa ka yimaaddaan caanihii ma bislaanin. Caanihii saafiga ahaayo, aan arki jirnay, ma garanaysaayoo, ahaayo ma aha. Waa kow. Wuxuu ka yimaadaa islaanta ruuxeeda waxay cunto oo iyadu cunto, haddii iyadu ay had iyo goor ayan naasaheedas hagaajinin oo ayan waqti u siinin, ama waxa, caashan caanaha ayan xilli ku siinin oo ayaan hadda u qiyaasin caanaha, taana waa ka yimaadaan. Laakiin culumada, waddaaddii iyagoo iyaga wax kastoo saas ahoo yiraahdaan yaa dabayl, dabayshuna waa maxay?Waa riixal axmar, jin baa maray, meed bay ku joogsatay. Sidatan weeye. Laakiin anigu waxaan qabaa ee calooshaas, bilmatal dad waaweyn, waa tan la yiraahdo kaneecaa cuntay. Cunuggaas kaneecada curatay hadduu "karooneko" noqdo waxuu isu haddaba "tiifow". Tiifowgaas waxa weeye tixiri caloosha ku beermay. Marka jajabkii waa "baralis", baralsikuna waxa weeye xidida jogsaday, xididdo, caashan, shaqaynaayey oo laakin sidii ay u shaqaynaeyay aan u shaqaynin oo joogsaday, halkaasay ka yimaadaan baralis.

**A.N.** Ka halkaas kaga sii gudubno, ee aan u gudbiyo ninka la yiraahdo Cali. Cali adiga cudurka jamjamraacka ahoo lugaha beelaan oo, maxaad oran lahayd?

**Cali** Horta cudurkaas annagu waxaan niraahdaa cunto aan dhamayn ayuu ka yimaadaa. Cunto aan dhammayn waxaa weeye caanaha la siinaayo hadduuna dhammayn oo fitamiiniska noocyadiisa ayna dhammayn, horta cunuggii waa jirranayaa, laakiin filamiin "sii" ku filan hadduun lahayn ilkihiisi way xumaanayaan, lafihiisa waa xumaamayaan madaxu waa kala daadaadanayaa cudurra badan ayaa ku dhacaaya, mar haddii cuntada isdheellitirnayn cudurro badan ayuu qaadayaa cunuggu, sidaas daraaddeed, haddii cunto isumiisaananoo dhan cunuggaas oo cuno, wakhti lagu siiyo ee hab fiican lagu siiyo cunugaas ma uu ku dhacaayo cuntadaas. Waxaa la yiraahdaa oo kaleeto:"carrabka waa miraayadda caafimaadka" cunuggada carrabkiisa haddaad aragto waxaad garanaysaa in uu caafimaad yahay iyo in kaleeto. Markuu guduudan yahay calaamuu leeyahay, markuu cadyahayoo carrabka korkiisu cad yahay, markuu sisib yahay cunugaas intaas oo dhan ma fiyooba. Hadduu cadyaha, carrabka oo ay saarantahay cad ma caafimaad qabo. Markii cagaar ahaan ku jiro ma caafimaad qabo sisib haddow yahay caafimaad qabo. Carrabka waxaa la rabaa in oron sisibna ahayn, guduudnayn, caddayna ee xarfad uu leeyahay yaa la doonayaa, mar hadduu xarfad leeyahay owna sisib ahayn owna caddayn, oowna gaduudnayn oon cagaar ku jirin cunuggaas waa caafimaad qabaa. Sidaasaana lagu garanayaa….

**A.N.** Halkaas, kaasa kaga sii gudubno, waxaa u sii gudbayaa cudur la yiraahdo oo isagana kaa ka sii fogayn la yiraahdo "madaxweynow". Madoweynow ayaa la yiraahdaa oo cudurkaan ayuu ku dabaxiran yahay, waase kaga gaddiisan yahay, Marbaa ilmaha madaxa weynaadaa aan lugaha wax ka gaarin. ………..laakiin madaxiisu si kale noqdaa Marka bal cudurkaan madaxweynow waxaa lagu daweeye sida uu u yimaado, Daahir Afqarshow, maxaad ka oran lahayd?

**Aw.Daa** Waxaan ka oran lahan, cudurkaan waxaa laygu yiri wuxuu ku badan yahay dhulkaa adigu aad ka timid ee xeebaha bariga ah. Waxaana la yiri waxaa u sabab ah dhulka, ma aragtay, kalluunka lagu cunee xoolaha noole ay, maragtay, ay ku yaryihiin oo "riix" baa la yiraahdaa, markaa dabadeena waa faytamiin ka maqan, waxaana la yiri dawadaa adigaa aad ugu fiicanee bal hadda noo yar faahfaahi waaba doonaynaa.

**A.N.** Waxaa la yiri cudurkaan madaxweynow, horta caruurta madaxaa weynada, madaxaa farihiisaa kala baxbaxa, caruurta markay yaryan yihiin waad la socotaan madaxoodu waa kale furfuran yahay. Halkaan waxaa la yiraahdaa dhaladaa waxaa meel nasasabe la yiraahdo ayaa jirta oo aad u dhaandhaan tahay oo "nagnagnag" tiraahda ama "nagnaglay" dad dhaha, "nadiifo" waa ka nasanayaan baa la yiri, madaxiisu aad buu u furfuranyahay ayaa la yiri, madaxiisu aad buu u furfuranyahay la yiri. Saa ula socolaanii cudurkaasu waa cudiir horbe fiitaamin "sii" ayaa korkii ka maqan cilmi ahaan, laakiin innagu waxaan oran karnaa oo cudurkaas waa la gubaa. Soomaalidu way gubtaa oo dab ayey ku dabiibtaa ama madaxaa marka hore xiirtaa saan madaxa u ballaran. Ilmihii aan madixiisa la xiirin madixiisu waa weynaanayaa oo farihiisaa kala tegahayaa. Hadduu cudur noqadana waxaa lagu samaynayaa wax la yiraahdo, way gubaan, oo meela ay ka yaqaaniin baa niman takhtar ahbaa guba. Sida aad u tiri aad moodday in kalluunkuba u sabab yahay oo cudurku ka dhasho, horba heedka kan aa lagu daaweeyoo, waxaa la siiyo "ooliyomarluusa" wax la

yiraahdo, “oolyo merluuso” beerka libaaxaa laga soo bixiyaa. Marka geedka kalluunka waa u dawo, inkastoo cudurkaa uu xeebaleyda ugu badan yahay. Maxaad adigu oran lahayd cudurkaa madaxweynow iyo sidaa loo daweeyo iyo habka loo qabto iyo.

**Fiqi** Cudurkaa horta madax weynada ah ama miyi ha joogo ama magaalo ha jooga waa “brootiin” la’aan waxaa weeye “bitamiin” ka maqan weeye, maxaa yeelay dadku markuu waaweynaado madaxiisu waa laf, markay caruurto yartahayna waa rabal oo kale, waxaa weeyaan waa wax saa u soo laabno weeye. Maxaad ku garan kartaan? Caruurta markay soo dhacdo waxay yiraahdaan malaa’ig baa u dhigtay sacabbada. Waa kow, marka sacabbada ma ay dhigin, qofka waxaa jebiya miisaanka. Horta mar waa miisan yaryahay, marna madaxiisa iyo lafahiisa yaan Weli adkaaninoo, waxaa weeye curdin dhayla ahoo aan labta noqonin aad moodial rabal. Marka waxaas oo dhami waa khalad. Waa kow, wuxuu la weynaadaa waa “bitamiin” ka maqan oo waxay la socotaa curuuqdii hore joogsatay “bitamiin” ka maqan buu ahaa, bahashaan la yiraahdo waa dabayl. Madaxa ka weynaadayna, waxaa weeye “bruutiin” ka maqan. Bruutiinkaasuu tabayaa, marka markaa lagu arko waxaa la sameeyaa iskutallaabay ku dhuftaan madaxa, “dhag” ayay ku siiyaan oo dab ah, dabkaasay ku waxeeyaan. Soomaalida markaa waxay tiraahdaa: “dab iyo cudur meel ma wada galaan”, oo isuma imaaddaan, ama cudurkii baa baxaya ama dabkii baa ….. hagaajinaya, saasaa la yiraahdaa oo waxaa la yiraahdaa:”dab iyo cudur meel ma wada galaan”. Marka dabkaasaa lagu daweeyaa, hase ahaatee waxaan anigu qali lahaa, haddii bruutiin kaas ka maqan la siiyo inuu buqsun lahaa baan anigu qabaa.

**A.N./** Weli waan dabasoconaa, cudur kalaan ku sii dabaqabanayaa oo weli kaa la socda oo isagu gooni u socda. Waxaa la yiraahdaa “cusbadado” ayaa jira. Marka iga raalli ahaada … Bal taana wax ka dhahaya.

**Fiqi** Horta ma maqasheen waxa la yiraahdo baabasiir ma maqashay weligaa? Reer magaaluhu waa iska gooyaa oo waa gubaan, laakiin hooyooyinku way cusbeeyaan markaasay u shiilaan subag, markaasay waxay soo qaadaan dhir la yiraahdo, adiga, dhir carruureed yaa la yiraahdaa. Dhircarruureeddaasa baa subag lagu waxaynayaa, subaggaasaa ilmaha loo marinayaa wejiga iyo dhabarka iyo waxaasaa loo marinayaa oo cusbadaasaa lagu waxaaynaayaa, laakiin waxa kan lagu cusbeeynaayaa “cusbaa haysa” baa la yiraahdaa, dee baabasiir baa la sancaynahayaa. Halkaasaa yaa arrintu ku jirtaa.

**A.N.** Daahir Afqarshow, maxaad ku dari lahayd, adigoo soo gaabina.

**Aw. Daa** Xaajigaa boqolkiiba boqol ku waafaqsanahay. Xanuunkaas baabasiirta la yiraahdo ee dadka waaweyn ku dhacda ee ay hooyooyinka ilmaha ka daweeyaan oo ay gelinaayaan cusbo magaalooyin laga helo oo la yiraahdo “cusbo lab” oo iyadurna laba nooc, oo haddaad farta xagga ka mariso. Xagga shisha kaga qabato, farta hadday sida muraayadeha ka muuqatana, waa tii wiilasha ay yiraahdaa. Haddii ay ciir ku yara jiraan oo aanay sida muraayadda bahashii cusbaday jaafiga ahayd si wanaagsanna ugu muuqanna “tar hebla aa la yiraahdaa oo waa kala tan weynyihiin, waa cusba carruureed”. Markaa dabadeed waxa iyana hooyadu waxay leedahay “cantuugada libaaxa” bahashaas cudurkaa ilmaha ku dhac cantuugada libaaxa oo kaluu lee yahay. Waxaad arkaysaa ilmaha “dhag”

siduu u yiri miir ma la oo hooyadi carrabka …. Indhihii kala qaada oo ilmihii ordaya aad aeagtid. Sidaa aawadeed bay u yiraahdeen cantuuga libaaxa ayuu leeyahay. Waxyaabaha hooyooyinka wanaagsan ilmaha la koriyaa waa ka mid. Marka jirka oo milix qaadanaya, kow dheh, oo waa dhirtii oo laga ilaalinayo, laba dheh. Waxyaabaha badni ilmaha lagu koriyaabaaka mid yihiinoo, hooyo waa inay "specially" ee haysataa. Ninkana marka hore aabaha sidaa u soo diyaar gareeyaa caruurta. Maantana waa qaaliyoo dunidaba lagamaba helaba, waxaa laga yaabaa in geni laga bixiyaa mirkii qura ahaayoo la ekaa cudduda qof maanta inta la eg. Marka dawooyinin waawyen bay ka mid tahay.

**A.N.** Waad ku mahadsintihiin saad u soo koobteen oo aad u sharraxdeen, kow wax ku dar maleh. Waxaa kalood idin weydiin lahaa cudur kaloo jira caruur …., haddaayeena meela kaga hadasheen laakiin, magaciisa dhabta ahi uu yahay "huguf". Caruurtii baa huguftay. Cadurkaa hugufkaa hadduu magacyo kalee leeyahayna yaa ee …. Bal cudurkaa hugufkaha noo sharrax

**Fiqi** Cudurkaa hugufka la yiraahdaa "dabayl wac" baa la yiraahdaa. Waxa weeye, marka wax ordaya ooy socdaan waxaa kugu soo weecda bus baa kugu soo weecda. Buskaasaa huguf la yiraahdaa. Hugufkaasna wuxuu kaga yimaadaa madaxa caruurta ku dhacaa, oo qof soconaya guriga soo galay ama bannaanka ka helay oo dibadda ka yimid hugufkaa ku dhacay markaasaa cudurkaa ku dhacay.

**A.N.** Anigu hugufka waxaan u arkaayaa ee waxaan u aqaanaa caruurta markuu hugufka qof geeda isa soo mariyay ama naag geeda dhalaano iyo wax soo marsatay ama alaab kale ay soo marsatay oo qof qasad qobo… ama cudurra kale qaba wax siisatay hadduu caruurta soo ag maro caruurta way hudaysaa, oo …. Ka soo yaacaysaa, wax baa ka soo baxbaxaya, marka bal middaa ii sharrax.

**Aw.Daa** Cudurka waa laguu yaqaanaa. Dad iyo xoolaba waa ku dhacaa. Matalan waxaad ka soo qaaddaa xoolaha aynu haysaanno geelaa u tan weyn baa ama maalin walba cabbaa, wuu xaaraa. Haddii nimaan raacijirin dhex karo urta uu la dhexmaro ama geel kale uu ku darmo oo aragtidiisa ahayn ka taal(?) dabeeyshiisa uu maanta uriyo caawaa la arkayaa geelli oo …… ka dhiiqay oo neef miiran ka imanaysoo oo halka xaarka ku siinayo bannanka oo la leeyahay waa ragrakooday. Ragrakadeen waxay ka timid, dabadeed, hugufkaa. Neefka ayaamo dhan baa neef ka imanaysa oo "dhuruurug" taa gurayoo, xaarku sayri gelinayo waayayaa oo, caanihii uu gurayaayoo, balaayaa dhacaysaayoo, raaggii islaynayaa oo markaasaa la oranayoo: "maxay waxaas ku dhaceen". Markaasaa la oranayaa oo geela waa ragrakoobay".